


Su'aalaha badanaa ay isweeydiyaan kiraystayaasha degan 120 Racecourse Road iyo 12 Holland Court, Flemington

20-ka Sebteembar 2024



Somali | Soomaali

Maxaa maanta lagu dhawaaqay?

Dawladda Victoria waxay ku dhawaaqday goobaha xiga ee dayactirka lagu sameyn doono iyadoo qayb ka ah Mashruuca Weyn ee Guriyeynta Victoria. Goobahani waa:

- 139 Highett Street, Richmond
- 259 Malvern Road, South Yarra
- 6 iyo 8 Anderson Court Richmond
- 1 - 5, 7 iyo 9 Williams Court Richmond
- 111, 119 iyo 127 Elizabeth Street Richmond.

Warbixintan lagu dhawaaqay maxay aniga iiga dhigan tahay?

Ma jiraan wax isbedel ah oo lagu sameeyay qorshaha dib-u-dhiska dabaqada 120 Racecourse Road iyo 12 Holland Court sanadka 2031.

Fadlan sii wad inaad la shaqeyso kooxdaada raritaanada si aad u heshid guri cusub oo buuxinaya baahiyahaaga iyo in la dhameystiro guuritaankaaga.

Rarista Flemington iyo North Melbourne waxaa la dhameystiri doonaa **bisha Sebteembar ee sanadka 2025**.

Sidee bay u ekaan doonaan guryaha cusub ee Flemington?

Naqshadaynta guryaha cusub lama dhamaystirin laakiin waxa ku jiri doona guryo bulsho oo casri ah oo sugan.

Waxaad heli doontaa fursad aad nagula wadaagto ra'yigaaga ku aadan naqshadeynta marka la dhammeeyo.

Xafladaha bulshada ee la imaan karo bilan la'aanta

Waxaa jiri doona shaqaale ka socda Homes Victoria iyo xafiiska guriyeynta deegaanka oo heegan ku ah dhismaha 120 Racecourse Road iyo 12 Holland Court si ay uga jawaabaan su'aalo kasta oo aad qabto.

Waxaa laga heli karaa:

- 10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo Jimcaha 20-ka Sebteembar
- 9-ka subaxnimo ilaa 12-ka galabnimo Sabti 21-ka Sebteembar.

Sidee ku heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Mashruuca Weyn ee Guryaha, nidaamka raritaanka iyo qorshayaasha dib-u-dhiska dhismayaasha dhaadheer:

- Ka qaybgal xafladaha bulshada ee la tagi karo bilan la'aan
- Kua hadal kooxda raritaanka 12 Holland Court maalmaha Talaadada iyo Khamiista 10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo
- La xidhiidh xafiiska guryaynta ee deegaankaaga
- Wac 1800 716 866 si laguugu xiro xafiiska guryeynta ee deegaankaaga (9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha). Turjubaano ayaa diyaar ah haddii loo baahdo
- Booqo websaydkayaga cusub ee bighousingbuild.homes.vic.gov.au halkaas oo aad wax ka waydiin karto kooxdayada rarida
- Emailenquiries@homes.vic.gov.au.